

Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Xirfadaha Sare



Waa maxay Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Xirfadaha Sare?

Barnaamijka Deeq-waxbarasho ee Xirfadaha Sare (CSSP) wuxuu kaa caawin karaa maalgelinta iyo adeegyada taageerada loo baahan yahay si loo dhigto barnaamijyada shahaadada laba iyo afarta sano ah ama la qaato shahaadooyin laga aqoonsan yahay suuqa shaqada taasoo horseedda helidda mid ka mid ah shaqooyinka mushaarka sare ee gudaha Maine ee qeybaha shaqo ahaan baahida loo qabo.

Caawinta Dhaqaale iyo Adeegyada Taageerada

Deeqda waxbarasho ee Xirfadaha Sare waxay ka caawisaa shakhsiyaadka u qalma kharashyada aynan ka daboolin kaalmada maaliyadeed ama deeqaha waxbarasho ee kale. Marka laga reebo kharashka waxbarashada iyo khidmadaha, ka qaybgalayaasha dakhli ahaan ugu qalma waxa laga yaabaa inay ku helaan caawimo taageerooyinka loo baahan yahay si ay u dhammaystiraan koorsada waxbarashada sida:

- Xanaanada caruurta
- Gaadiidka
- Buugaagta loo baahan yahay, saadka, qalabka, agabka, lebis dugsiga
- Dayactirka baabuurta
- Kumbuyuutar, haddii loogu baahan yahay barnaamijka waxbarashada
- Gunnada tababarka billaha ah

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto Deeqda Waxbarasho ee Xirfadaha Sare haddii aad:

- Degan tahay Gobolka Maine
- Jirto ugu yaraan 18 sano ama aad ka yar tahay 18 sano haddii aad ka qalinjabisay dugsiga sare
- Dhiganayso waxbarasho ama tababar shaqo oo mushahar sare leh, shaqo ahaana baahi loo qabo
- Haysanin shahaado dugsiga sare kadib ah ama shahaado suuqa shaqada laga aqoonsan yahay oo looga shaqaysan karo Maine
- Awood u leedahay in aad bilowdo oo aad dhammaystirto barnaamijka, waxbarashada ama tababarka
- Haysato dhakhli ka yar 200 boqolkiiba heerka faqriga federaalka ee tirada goyska

Su'aalaha Badanaa La Weyddiyo

Maxaa loo aqoonsan yahay shaqo-mushahaar sare leh, shaqo ahaanna baahi loo qabo?

Shaqooyinkani waxaa lagu qaataa celceliska mushaharka ama ka sarreeya celceliska mushaharka dhammaan shaqooyinka Maine waxaana la saadaalinayaa inay furmi donaan ugu yaraan 35 shaqo banaan sannadkii. Fiiri Waaxda Shaqada ee Maine liiska shaqooyinka sare ee mushaharka sare leh, shaqo ahaanna baahi loo qabo barta www.myworksourcemaine.gov/pages/competitive-skills-scholarship-program-cssp

Intee ayaan filan karaa inaan helo?

Haddii aad u qalanto, waxaad heli kartaa ilaa \$6,000* sanad dugsiiyeedkii arday waqti-buuxa ah ahaan iyo \$3,000* sanad dugsiiyeedkii arday waqti-dhiman ah ahaan iyadoo ku salaysan baahida aan la daboolin iyo taageerada loo baahan yahay. Waxaad u qalmi kartaa deeq sanad kasta oo aad ku sii jirto barnaamijkaaga tababarka. *Lacagahaas kuma jiraan kharashyada daryeelka ilmaha ama gunnada tababarka ee billaha ah.

Ma inaan dib u bixiyaa?

Deeqda Waxbarasho ee Xirfadaha Sare waa deeq, ma aha deyn, mana aha in dib loo bixiyo marka barnaamijkaagu aad dhamaysato.

Sideen ku bilaabaa?

Booqo www.myworksourcemaine.gov/pages/competitive-skills-scholarship-program-cssp si aad u buuxiso arjiga onlaynka ah ama la xirii CareerCenter ee kuugu dhow shakhsi ahaan ama ka wac 207-623-7981. Isticmaalayaasha TTY wac Gudbinta Maine 711.

Wax su'aal ah? limeyl ugu dir CSSP.DOL@maine.gov.

